



WARSIDAHHA AGA

AGA NEWSLETTER

WAA WARSIDE-XILLIYEED KU HADLA CODKA
AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA (AGA)
A PERIODICAL NEWSLETTER PUBLISHED BY THE
INTERGOVERNMENTAL ACADEMY OF SOMALI LANGUAGE

TIRSIGA 17^{AAD}, SANNADKA 5^{AAD}, JANNAAYO– MAARSO 2022
Vol. 5, No. 17, January– March 2022

HADAFKAYAGU WAA HILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA

Ku soo Dhowaada Warsidaha AGA!

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka Afsoomaaliga (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeedooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal'abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan. Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadka arrimaha kore.

Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa.

Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaliga.

*Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan
iyo mid elektoroonig ah (eeg www.aga.so).
Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa Email: info@aga.so*

TUSMADA TIRSIGAN

ERAYGA TIFAFTIRKA

Maalinta Afka Hooyo & 50guurada
Hirgelinta Far-Soomaalida.....Bogga 2aad

QORMOYIN HORTABIN MUDAN

'Mataantaadii Maana-faay' – Maxamed
Daahir Afrax..... Bogga 3aad

WARARKA WAXQABADKA AGA

Xuska Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo
.....Bogga 5aad
Silsilad Maanseedyadii Soomaalida ee
Qarnigii 20-aad.....Bogga 6aad
Tababar loo Qabtay Hawl-wadeennada
AGA.....Bogga 7aad
Munaasabadda Konton-Guurada Hirgelinta
Far-Soomaalida.....Bogga 7aad

WARAR KALE OO XUSID MUDAN

Bandhigga Buugta Banaadir oo ku Qab-
soomay Muqdisho.....Bogga 8aad
Xarunta Dhaxal-Reeb oo Qabatay Tab-
abar ah Af-Soomaaliga & Habqoraalkiisa
.....Bogga 8aad

KORORSO AQOONTAADA

Qaafiyadda.....Bogga 9aad

SUUGAANTA & HAL-ABUURKA

Halwad.....Bogga10-1aad

GOOSANKA TIFAFTIRKA

Tifaftiraha Sare

Mustafa C.Fayruus

Agaasimaha

Axmed M.Dhiciisow

Agaasimaha Farsamada

Axmed Faarax Saalax

Kaaliyaha Farsamada

Amiin Yuusuf Khasaaro

Xoghayaha Tifaftirka

Saynab Xaaji Axmed

Bahda Tifaftirka

Cabdullaahi Shiiqaalow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi Sh. (Gacanka)
Dayax Axmed Ilay

Kala xiriir : info@aga.so

Facebook: [@aga.afsoomaali](https://www.facebook.com/aga.afsoomaali)

Twitter:[@somaliacademy](https://twitter.com/somaliacademy)

Website :www.aga.so



**Golaha Fulinta AGA oo booqasho sharaf ugu tegey
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti
Md Ismaaciil Cumar Geelle, 30/3/2022, Jabuuti.**

ERAYGA TIFAFTIRKA

Maalinta Afka Hooyo & 50guurada Hirgelinta Far-Soomaalida

Waa tirsigii 17aad ee Warsidaha AGA, wuxuu diiradda saarayaa barnaamijyadii lagu xusay 'Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo', oo ku beegnayd 21/2/2022. Sidoo kale, waxaa innoo curtay sannadka 2022, oo ku beegan 50guurada hirgelintii Far-Soomaalida, oo ah munaasabad qiimaheeda iyo qaayaheeda huwan.

Waa mar kale iyo xuskii sannadlaha ahaa ee 21 Febraayo, 'Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo'. Waa xus ka dhashay qayladhaantii Hay'adda UNESCO ee Qarammada Midoobay ay gaarsiisay adduunweynaha, oo ahayd in kala bar in ka badan afafka dunida looga hadlaa ay halis ugu jiraan, hadaan loo gurman, inay ku dabar go'ayaan konton sano gudahood.

Taas ayaa sababtay in bishii Noofembar, 1999kii Golaha Guud ee Qarammada Midoobay ku dhawaaqo in ay dunidu 21ka Febraayo u aqoonsato 'Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo', dal kastana laga xuso; go'aankaasna wuxuu dhaqan gelay laga soo bilaabo sannadkii 2000. Ujeeddada xuska maallintani waa in la muujiyo, la isna xusuusiyo, qiimaha uu ummad kasta ugu fadhiyo afkooda hooyo; ayna tahay in qolo kastaa ilaashato afkeeda hooyo, horumarkiisana ku dadaasho.

Sidaas daraadeed, Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaligu, iyadoo kaashanaysa bahwadaagteeda ay ka wada shaqeeyaan u hiillinta afka hooyo, waxay si sannadle ah u agaasintaa xaflado iyo kulammo aqooneed, fagaarayaasha laysugu keenayo waxgaradka iyo aqoonyahanka bulshada, dadkana lagu baraarujinayo qiimaha afkooda hooyo u leeyahay iyo xilka ka saaran daryeeliddiisa iyo tayaynta adeegsigiisa. Dhanka Soomaalida, xuskani wuxuu noqdaa barnaamijyo taxane ah oo socda dhawr maalmood, laguna kala qabto geyiga Geeska Afrika iyo qurbaha Soomaalidu joogto; sidaas darteed, ayaan ugu naanaysnaa 'Toddobaadka Afka Hooyo'.

Sannadkan waxaa la qabtay barnaamijyo isugu jira kuwo fool-ka-fool ah iyo kuwo ku baxay aaladda Zoom-ka, iyo sidoo kale, barnaamijyo ka baxay qalabka warbaahinta ee kala duwan.

Guud ahaanba, waxay daarranaayeen sidii loogu hiillin lahaa afka hooyo, loona kobcin lahaa adeegsigiisa.

Konton-guurada Far-Soomaalida

Sannadkan 2022 wuxuu ku beegan yahay konton-guurada hirgelinta Far-Soomaalida. Waa munaasabad qiimaheeda iyo qaayaheeda gaarka ah u leh ummadda Soomaaliyeed.

Dadaallo muddo soo taxnaa ka dib, sannadkii 1972 ayay Dawladdii Soomaaliya go'aan ku gaartay hirgelinta Far-Soomaalida. Waxaa lagu dhawaaqay go'aankii, waxaa xigay tallaabooyin lagu kaabayay hirgelinta go'aankaas. Waxay ahayd tallaabo dhaxalgal ah oo loogu hiilliyay afkii iyo dhaqankii ummadda; tallaabo loogu hiilliyay aqoonta iyo kasmada. Waa mid ka mid ah dhawrka arrimood ee wax-ku-oolka ah ee ummadda Soomaaliyeed qabsatay xornimadii ka dib.

Waxaa curashadii sannadkanba la kowsaday abaabulka barnaamijyo lagu weyneynayo munaasabaddan 50guurada. Kuwo kale jidka ayay ku soo jiraan. Waxay isugu jiraan noocyo kala duwan. Guud ahaanba barnaamijyadani waxay socon doonaan ilaa bisha Diisambar 2022.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay munaasabaddan ugu talagashay barnaamijyo taxane ah oo kala duwan, oo isugu jira kuwo aqooneed iyo cilmibaarisyo la soo bandhigayo, kulammo dadweyne, kuwo damaashaad iyo raynrayn lagu muujinayo, kuwo lagu falanqaynayo hawshii qabsontay iyo wixii qabyo ah ee inna sugaya xilligan. Barnaamijyo milicsanaya shalay, maanta iyo berri

Ahmiyadda ay munaasabaddani leedahay iyo baaxadda barnaamijyada ay tahay in loo qabto awgeed, Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu waxay u magacawday guddi heer sare ah oo uu gadhwadeen ka yahay Prof Cabdalla Cumar Mansuur, isla markaana ay kaalinayaan labada guddoomiye-ku-xigeen Dr C/rashiid Maxamed Ismaaciil iyo Dr C/naasir Axmed Ibraahin.

QORMOYIN HORTABIN MUDAN

‘Mataantaadii Maana-faay’ – Maxamed Daahir Afrax

Inan aroos ah oo annu qaraabo ahayn ayaa noogu timid magaalada. Waddanka Ivory Coast magaalamadaxdiisa Abidjan ayay ku socotay. Cidladay ku socoto ayaan ka naxay, anigoo isbi-daya in aan ka nasiib badanahay maadaama jaaliyad Soomaaliyeed oo tiro fiican ahi ay degan tahay magaaladayadan Cardiff ee waddanka UK.

Wada sheekaysi iyo isku farax ka dib, waxaan la wadaagay buugaag ay walaashay Amaal Xaaji Aadan-Sharci ay Xamar iiga soo dirtay; waa ‘Maana-faay’, waa ‘Aqoondarro waa u Nacab Jacayl’, iyo ‘Ayaan Daran’. Saddex buug, oo mid waliba yahay daabacaaddiisi ugu horraysay. ‘I amaahi’ ayay i weydiisatay. Aad bay iigu celcelisay, ballanna ay ku qaadday inay akhriskooda ka dib, boosta ii soo dhigi doonto. ‘Biloo dib ay kugu soo noqon waayaan’ ayaan judhiiba is idhi. Nasiibdarro iyo nacashimaba, naxariistaydaa ka xoog badatay lexlajecladayda oo anoo dhanna ka werwersan dhanna iyada u naxaya ayaan ku aaminay oo ku taagay buugtii qaaliga igu ahayd. Sidii baanay iigu soo noqon!

Iyadoo taasi ay taa tahay, ayaan 10eeyo sannadood dabadood booqday hay’ad la odhan jiray The African Centre oo xaruntoodu ku taallay Covent Garden, London. U qaadan waa iyo farxad-naxdin, waaba buuggii Maana-faay oo rakooyinka mid ka mida taxan. Horay-horay ayaan ula booday, sidiiyoo ay hortayda mar qudha ka libdhi doonaan.

Sannadkii 2008dii oo iyana 10eeyo sannadood ka dib ahayd ayaa London waxaa ka socday bandhigga (Somali Language Festival & Touring Book Fair) uu soo qabanqabiyey naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed ee Somali Speaking Pen (SSPEN). Waa sannadkaan la kulmay qoraagii sheekadii Maana-faay een marxaladahaas kala gedgeddisan la soo maray – waa Maxamed Daahir Afrax, Allow u naxariisoo qabriga janno janno ku sug uga dhig, Aamiin.

Anigoo ilnugayl iyo khajilaad badan is diidsiinaya ayaan abbaaray qoraaga, markaasaan u sheegay in aan haysto nuqul ah buuggii Maana-faay iyo inay aad sheekaadaasi ii cajabisay. ‘Halkeed ka heshay, waa horuu daabacaadda ka baxee’ iyo waraysi yar dabadii inuu ii saxeexi doono ayuu iigu ballan qaaday. Maalintaasi may noqon maalintuu ii saxeexay nuqulkaygaa aan aadka u ilaashanayey.

Afar sannadood ka dib iyo Toddobaadka Dabbaaldega Soomaalida ee 2012, Somali Week Festival 2012, oo bisha Oktoobar sannad walba bariga London iyo xarumo kalaba lagu qabto, ayaan si joogto ah sannad walba uga qayb qaataa. Runtii, waa toddobaad si gaar ah aan u ilaashado, waayahaygana saamayn laxaad leh ku yeeshay. Sannadkani waa markii xigtay ee annu kulmi doonno Maxamed Daahir Afrax. Si toos ah waxaa isku kaaya baray walaalkay Axmed Cabdiraxmaan Xasan, oo runtii hawlahaan ku jiro taageeraha koo-waad ka ah. Laga bilaabo sannadkaa ilaa iyo waqtiguu Eebbeheen oofsaday addoonkiisa, aniga iyo Maxamed xidhiidh dhow iyo wadashaqayn joogtaysan ayaa naga dhexaysay. Nuqulkaygii Maana-faayse doorkanna la iima saxeexin, sheekada saxeexuse weli way socotaa!

La kulanka Maxamed Daahir Afrax, AHUN, laancigaaleed ayuu u noqday ololahaan 2009kii isku xukumay ee ku bilaabmay ‘**Daadah – Baro Af -Soomaali**’, ka dibna fadhiistay ‘**ARDA**’, welina geeddigiisu uu socdo. Magacyadan ‘**Daadah**’ iyo ‘**ARDA**’ waa taxanayaal akhris iyo waxbarasho oo carruurta dalalka dibadaha ku dhashay ama ku koray ka taageeraya barashada Af-Soomaaliga iyo dhulka ay ka soo jeedaan. Wuxuu igu arkayba, sannadkaas 2012kii wuxuu Maxamed ii magacaabay xubin ka mida naadiga Qalinleyda iyo Hal’abuurka Soomaaliyeed, iguna casuumay Shirweynihii 5aad ee SSPEN iyo dabbaaldeggii 40guuradii Far-Soomaaliga ee isku sidkanaa. Nuqulkaygii Maana-faay oon sidii isku daba sido, sannadkaas iyo magaalada Jabuuti ayuu qoraagu iigu saxeexay.

Maxamed, Allaah ha u naxariistee, aad iyo aad ayuu u saameeyey noloshayda iyo jihada takhasuskaygu noqday. Sannadkii 2014kii ayuu haddana ii sheegay in xil la iigu magacaabay ah in aan ka mid noqdo Guddiga Naxwaha ee Akademiya-Goboleedka AfSoomaaliga.

‘Nin aanad saacad ku baran, sannad kuma baratid’ waa murti Soomaalidu tidhaa. Maxamed wuxuu lahaa fiiradheeri iyo karti uu qofka ku akhristo, weeleeyana xirfaddiisa iyo kartidiisa oo meeshay ku habboon yihiin u jihayn yaqaan. Qof wuxuu ahaa qofkiisa ka war haya oo la socda waayihiisa. Adigoon filayn qoraal gacalnimo oo horumarkaaga kugu hambalyeynaya kuu soo dira.

Dadkii faraha badnaa ee xusaskii iyo baroordiiqdii badnaa wax ka soo qoray ama wax ka yidhi waayaha iyaga iyo Maxamed soo kala dhexmaray, waxaa iiga baxayay meelo badan in aan ka daba idhaa, ‘iyo ani’.

Nimco Cabdiraxmaan ‘Weedhsan’ waa da’yarta SSPEN, qormooyinkeedii xus iyo baroordiiqda waxaan ka xiganayaa ‘waxa aan lahayn xidhiidh joogto ah oo mar walba aniga horumar ii leh’...‘inantaydii buu mar walba igu odhan jiray’ iyo...‘mustaqbalka iyo maantaba waad ku xusan tahay horumarkayga adeer’. Ereyada Weedhsan, waxay iila dhignayd in aan anigu hadlayo!

Nasra Nuux waa dhallinyarta aannu barta bulshada Facebook asxaab ku nahay. Qormo ku saabsan waayaha iyada iyo Maana-faay dhexmaray ayey soo tebisay. Iyadana waxaan ka soo xiganayaa in sheekada Maana-faay 2006-2007dii si taxane ah ay ugu soo baxaysay wargayska Ogaal, Hargeysa. Waxay noo sawirtay inay iyada iyo walaalaheed kala boobi jireen marka aabbahood yimaaddo guriga isagoo sida nuqulkii Ogaal ee maalintaa soo baxay. Waxay tidhi, ‘aabbo albaabka ayaan kaga hor tagi jiray si aan wargayska anigu ugu hor qaato’ iyo ‘...

shan walaalo ah oon ku jiro ayaa sheekadaa ku taxnaa’.

Ereyada Nasra dib bay xusuustaydii ugu celisay dib-u-daabacaaddii buugga Maana-faay ee Loo Press iyo bandhigyadii badnaa ee lagu daahfuray midkood oo magaalada Birmingham ay goosanka AGA ee UK ku diyaariyeen. Aamina Muuse Weheliye ayaa nooga sheekaysay waqtigii Maana-faay Xiddigta Oktoobar lagu soo daabici jiray iyo xiisahay u qabeen. Inay dherersan jireen keenid-da guriga la keenayo nuqulka maalintaa soo baxay iyo kala boobidda inta xaafadda degan ay u kala boobayeen ‘anigaa hor akhrisan’ iyo ‘anigaa hor akhrisan’. Rubuc qarni ka badan ka bacdi waxay sidii muraayad u tebisay sheekadii iyo darenkii ay Nasra Facebook ku soo tebisay!!!

Qormo 33 bog ah, ayey innamo dhalinyaro ah oo afar ah intay isxilqaameen ka soo diyaariyeen xogaha cajiibka ah ee dadku xus iyo baroordiiq isweydaarsanayeen. Akhris baan ku boobay, aadna ugu bogay. Mucjiso kale ayaan ku gebagebeeyey, saamaynta laxaadkaa leh ee uu Maxamed ku yeeshay intay taariikhdiisu la falgashay!

Maalin Sabtida 9kii Oktoobar, 2021, waxay ahayd maalin gilgishay bahda qalinleyda iyo halabuurka. Maalin Ilaahay oofsaday addoonkiisii Maxamed Daahir Afrax. Eebbe ha u naxariisto e, aqoonyahan iyo xeeldheere tiir dhexaad saamayn ballaadhan ku lahaa afka, dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed iyo inta jecelba.

Hawlahuu igu ogaa halkoodaan ka sii wadi doonaa, idanka Eebbe. Aadna waxaan u boorinayaa in taxanaha buugta AGA lagu xuso Maxamed Daahir Afrax (AHUN) saamayntuu ku lahaa afka, dhaqanka, fanka iyo suugaanta Soomaaliyeed.

*W.Q. Saynab Aadan-Sharci
SSPEN & AGA, London (UK)*

WARARKA WAXQABADKA AGA

Xuska Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo kaashanaya bahwadaagteedu waxay abaabushay barnaamijyo lagu maamuusayay maalintan caalamiga ee afka hooyo; waxayna ka kala dhaceen magaaloyinka Muqdisho, Garoowe, Gaalkacyo, Minneapolis (USA) iyo aaladda Zoom-ka muddadii u dhexaysay 19-21/2/2022;

Waxaana ka soo qabygelay dadweyne, waxgarad, aqoonyahan iyo masuuliin kala duwan. Waxaa laga soo-jeediyay daraasado la xiriira adeegsiga Af-Soomaaliga ee xilligan iyo erayo laysugu tilmaamayo xilka innaga saaran u hiillinta afkeenna hooyo.

Zoom: 19 Feb, waxaa aaladda zoomka lagu qabtay aqoonwadaag ballaaran oo cinwaankiisu ahaa “Xuska Maalinta Afka Hooyo iyo Faaqidaadda Xaaladda Adeegsiga Af-Soomaaliga ee Xilligan”. Aqoonwadaaggani wuxuu ibafur u ahaa barnaamijyada taxanaha ah ee lagu maamuusayay maalintan afka hooyo; waxaana ka hadlay aqoonyahanno iyo masuuliin kala duwan.

Waxaa madasha furay guddoomiye ku-xigeenka AGA Dr. Cabdinaasir Axmed; waxaa kaloo ka hadlay Macallin Saciid Saalax, danjire Axmed Ciise Cawad, md. C/raxmaan Abtidoon, mw. Saynab Aadan Sharci iyo Foosiya Maxamed Cabdi, oo dhammaantoodba tilmaamay xoojinta dadaallada ilaalinta iyo daryeelka afka hooyo.

Muqdisho: 21 Feb; waxaa lagu qabtay xaflad ballaaran oo ay soo agaasintay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo kaashanaysa Gollaha Abwaannada Soomaaliyeed. Waxaa goobta ka hadlay masuuliin ay ka mid yihiin wasiirka Warfaafinta Md. Cismaan Abokor Dubbe, Xildhibaan Shiikh Aweys, Guddoomiye Ku-xigeenka G/Banaadir Basma Caamir. Waxaa xafladdan lagu soo bandhigay warbixin kooban oo ka hadlaysay waxqabadkii AGA ee 2021-2022.

Garoowe: 21 Feb; xafladdan waxaa AGA la soo qabanqaabiyay Wasaaradda Warfaafinta Puntland, PDRC iyo Somali PEN; waxaana ka hadlay masuuliin ay ka mid yihiin wasiiru-dawlada wasaaradaha Warfaafinta iyo Waxbarashada Puntland Dr. Cabdi-fitaax “Ashkir” iyo md. Cabdullaahi Xasan Rooble oo iftiimiyay in halis badan ay ku soo fool leedahay Af-Soomaaliga.

Gaalkacyo: 21 Feb, waxaa lagu qabtay xaflad ballaaran oo ay ka hadleen masuuliin iyo waxgarad kala duwan, waxaana ka mid ahaa Wakiilka AGA ee Gaalkacyo md. Burhaan Axmed Daahir oo si faahfaahsan uga hadlay qiimaha mu-naasabaddan caalamiga ah iyo hawsha ballaaran ee inna sugaysa si aan ugu adeegno afkeenna hooyo.



Madasha AGA ee Bisha Febraayo 2022

Xuska Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo
Faaqidaadda Xaaladda Adeegsiga Af-Soomaaliga ee Xilligan

Halkudhegga: U Hiilli Afkaaga Hooyo

Waxaa soo jeedinaya masuuliin iyo xeeldheerayaal ay ka mid yihiin

Md C/raxmaan Abtidoon Oslo (Norway)	Mac Siid Saalax Minnesota (USA)	Dr C/Naasir A. Ibraahin Ka/Guudoomiyaha AGA	Amb. Axmed Ciise Cawad	Prof Cabdalla Mansuur Muqdisho	Saynab Daahir Sharci London (UK)
Taar: 19/02/2022 Zoom ID: 786 605 0646 Passcode: AGA2022 Saac: 7:00 – 9:00 Fiidnimo WBA					
					<

Silsilad Maanseedyadii Soomaalida ee Qarnigii 20-aad

Madasha AGA ee bishii Jannaayo, oo aaladda Zoom-ka ku qabsoontay 08/1/2022, waxaa lagu gorfeeyay mawduuc cinwaankiisu ahaa "Falanqaynta Silsilad-Maanseedyadii Soomaalida ee Qarnigii 20-aad".

Madashan oo aad u xiisa badnayd waxaa ka hadlay abwaan Maxamed Cismaan Guuleed, suugaanyahan Rashiid Gadhweyne iyo macallin Saciid Saalax. Xeeldeherayaashani waxay si qotadheer uga sheekeeyeen silsiladihii Guba 1 & 2, Halac dheere, Xaydha, Hoomeey, Hurgumo, Siinleey iyo Deelleey. Waxay falanqeeyeen silsilad walba taariikhdeeda, sida ay ku timid iyo qaar ka mid ah maansooyinkeedu.

Waxay xeeldheerayaashu hoosta ka xarriiqeen kaalinta mugga leh ee silsiladuhu kaga jiraan suugaanta Soomaalida iyo siday kayd ugu yihiin afka, dhaqanka iyo taariikhdiisii Soomaaliyeed.

Soo-jeedintii xeeldheerayashaas ka dib, waxaa la gudagalay faallo iyo su'aalo ay ka qaybgalayaashu weydiinayeen xeeldheerayaasha.



Madasha AGA ee Bisha Jannaayo 2022

Falanqaynta Silsilad-maanseedyadii Soomaalida ee Qarnigii 20aad

Waxaa soo jeedinaya



Md Maxamed Cismaan "Abwaan"
Minnesota (USA)



Max Saciid Saalax Aamed
Minnesota (USA)



Md Rashiid "Gadhweyne"
Sheffield (UK)



Mac C/laahi "Gacanka"
Muqdisho

Taar: 08/01/2022
Zoom ID: 786 605 0646
Passcode: AGA2021

Saac: 7:00 – 9:00 Fiidnimo WBA



Xiriirinta
Najma Qaran-Bila
Muqdisho

AGA oo Aqoonwadaag u Qabatay Xubnaha Somali Pen

Akadeemiye-goboleedka AfSoomaaligu waxay 20/1/2022 qabatay aqoonwadaag cinwaankiisu ahaa "Muhiimadda Af-Soomaaliga iyo Kaalinta Dhallinyarada", waxaana ka faa'iidaystay dhal-linyarada Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed ee Somali Pen.

Kusimaha Guddoomiyaha AGA mw Maryan Cariif oo ka hadashay furitaankii aqoonwadaagga ayaa sheegtay inay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ka go'an tahay siday u kobcin lahayd dadaallada hiilka afka hooyo ee ay qaybta ka yihiin Naadiga Somali Pen, naadiyada akhriska iyo qoraalka iyo guud ahaanba bulshaweynta Soomaaliyeed.

Guddoomiyaha Somali Pen ee laanta Muqdisho, Cabdi-naasir Yuusuf Macallin ayaa sheegay si-day naadiga Somali-Pen uga go'an tahay u hiillinta afka hooyo.

Soojeedinta aqoonwadaagga waxaa udub-dhexaad u ahaa Prof Cabdalla Cumar Mansuur, oo soo-jeediyay cashar aad loo xiiseeyay, isagoo dhallinyarada kula dardaarmay inay hiil u noqdaan afkooda hooyo.



Kulanka Golaha Fulinta AGA

Waxaa Jabuuti ku qabsoomay kulan-hawleedkii Golaha fulinta AGA oo socday 28-30/3/2022. Waxaa lagaga wada hadlay hawlaha horyaalla AGA, oo ay ugu horreeyaan qabanqabada 50guurada hirgelinta Far-Soomaalida, qabanqabada shirweynaha 3aad ee AGA iyo furitaanka dhismaha xarunta dhexe ee AGA. Waxaa laysla qaatay sidii loo dardargelin lahaa hawlaha AGA kadib geeridii guddoomiye Afrax. Goluhu wuxuu magacaabay guddiyadii qaban lahaa hawlaha.

Tababbar Ioo Qabtay Hawl-wadeennada AGA

Waxay Akadeemiye-goboleedka AfSoomaaligu 13/3/2022 u qabatay xubnaheeda Muqdisho tababbar cinwaankiisu ahaa “Kaalinta ay Hawl-wadeennada AGA kaga Aadan Horumarinta iyo Ilaalinta Afka Hooyo”.

Furitaanka tababbarka waxaa hadal ka soo-jeediyay la-taliyaha AGA Prof. Mustafa Fayruus iyo agaasimaha tababbarrada md C/laahi Gacanka oo sheegay tababbarkani inuu wax weyn ka tari doono koruqaadidda xirfadda iyo aqoonta hawl-wadeennada AGA.

Tababbarkan waxaa bixiyay bare sare Cabdalla Mansuur oo halkaas ka soo-jeediyay cashar qiime leh; wuxuuna iftiimiyay hawlaha horyaal AGA ee dhinacyada cilmibaarista, eraybixinta, ururinta suugaanta, soo saarista qaamuus Af-Soomaali, wacyigelinta iyo guud ahaanba hawlaha AGA loo igmaday; wuxuuna ka hadlay tabtii iyo farsamadii hawlahaas loo fulin lahaa.

Casharka ka dib waxaa loo gudbay su'aalo iyo doodwadaag. Ugu dambeyn, waxay goosanku isugula dardaarmeen sidii ay kaalintooda uga soo dhalaali lahaayeen.



Muxaadaro ah Dadaalladii loogu Hiilliyay Afka Hooyo

Masuuliinta AGA ee ka qaybgelay Bandhigga Buugta Banaadir waxaa ka mid ahaa agaasimaha tababbarrada md C/laahi Sh. Cabdi “Gacanka”. Macallin Gacanka wuxuu bandhigga ka soo-jeediyay, 30/3/2022, muxaadaro uu kaga hadlayay dadaalladii loogu soo hiilliyay Af-Soomaaliga iyo aqoonyahannadii kaalinta lixaadka leh ka soo qaatay. Macallinku wuxuu tilmaamay in dhallinyarada xilligan looga fadhiyo in waxqabad la taaban karo ay afkooda hooyo ugu hiilliyaan.

Munaasabadda Konton-Guurada Hirgelinta Far-Soomaalida

Sannadkan 2022 wuxuu ku beegan yahay konton-guurada hirgelinta Far-Soomaalida. Konton sanno ayaa laga joogaa maalintii sida rasmiga ah Dawladda Soomaaliyeed u hirgeli-say Far-Soomaalida sannadkii 1972. Waa munaasabad qiimaheeda gaarka ah leh.

Akadeemiye-goboleedku waxay qors-haynaysaa inay munaasabaddan ku maamuusto barnaamijyo kala duwan. Qabanqaabada hawshan waxay u magacawday guddi heer sare ah oo uu hormuud ka yahay xeeldheeraha Af-Soomaaliga prof Cabdalla Cumar Mansuur; waxaa garab iyo gacanba u ah labada guddoomiye-ku-xigeen Dr C/rashiid Maxamed Ismaaciil iyo Dr C/naasir Axmed Ibraahin iyo xubno kale oo lagu kabay.

Munaasabaddan waxaa ku lammaanan shirweynaha saddexaad ee AGA oo lagu milicsan doono waxyaabihii u qabsoomay muddadii ay soo jirtay, hawlaha maanta taagan iyo hiigsiga mustaqbalka. AGA waxaa sugaya hawlo ballaaran oo u baahan wadatashi iyo qorshayaal lagu hawlgalo.



WARAR XUS & XUSUUS

Bandhigga Buugta Banaadir oo ku Qabsoomay Muqdisho

Waxaa magaalada Muqdisho ku qabsoomay Bandhiggii 3aad ee Buugaagta Banaadir “BBB3” muddadii 29-30/3/2022. Waxaa si rasmi ah u furay ku-xigeenka Guddoomiye maamulka G/Banaadir Basma Caamir Shakeeti, oo aad u bogaadisay tallaabadan.

Bandhigga waxaa lagu soo bandhigay bar-naamijyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin aqoonwadaag iyo muxaadarrooyin, bandhig buugaag, doodcilmiyeedyo, bandhig dhaqameed ikk; waxaana ka soo qaybgelay qalinley, dadweyne, aqoonyahan, waxgaradka bulshada iyo masuuliin kala duwan.

Bandhigga wuxuu socday muddo laba maalmood ah, waxaana soo xiray Wasiirka Wasaaradda Haweenka marwo Xaniifa Maxamed Ibraahim oo ku baaqday in ummadda loo jeediyo dhanka akhriska iyo qoraalka.

Qabashada bandhigga waxay timid xilli uu saf-markii Covid19 hakiyay badiba bandhigyadii buugaagta ee sida sannadlaha ah loo qaban jiray.



Xus iyo Xusuus loo Sameeyay Marxuum Kadare

Xus iyo xusuus lagu xusuusanayay marxuum dhaqan-yaqaan Xuseen Sh. Axmed “Kadare” (1934-2015), oo geeridiisa laga joogo toddoba sanno, ayaa Muqdisho lagu qabtay 1/2/2022. Xuskan, oo uu soo qabanqaabiyay golaha Kasmoo, waxaa ka soo qaybgelay masuuliin, suugaanyahan, qalinley iyo waxgarad kale; waxaana lagu soo bandhigay taariikhdiisii, waxqabadkii iyo suugaantii marxuum Kadare, oo geeriyooday 01/2/2015; waxaana la soo-jeediyay ururinta iyo faafinta waxqabadkaa.

Xarunta DhaxalReeb oo Qabatay Tababar ah Af-Soomaaliga

Tababar-xirfadeed ay soo qabanqaabisay xarunta horumarinta hoggaaminta ee Dhaxalreeb ayaa loo qabtay qaar ka mida suxufiyiinta iyo macallimiinta maaddada Af-Soomaaliga.

Tababbarkan oo lagu qabtay Muqdisho, wuxuu socday muddo shan toddobaad ah, 13/2-16/3/2022, waxaa soo-jeedinayay xeeldheer-ayaasha kala ah Prof Cabdalla Cumar Mansuur, Prof Maxamed Cilmi Tooxoow iyo qoraa Maxamed Warsame Hiraabeey.

Tababbarkan oo cinwaankiisu ahaa “Tababbarka Af-Soomaaliga iyo Habqoraalkiisa” waxaa lagu bartay casharro kala duwan oo ku saabsanaa Af-Soomaaliga iyo suugaantiisa, habka qoraalka iyo midayntiisa, iyo arrimo kale oo la xiriira Af-Soomaaliga iyo qoraalkiisa; waxaana ka faa’iidaystay ku dhowaad 20 isugu jira qalinleyda, saxaafadda iyo macallimiin.

Xafladda xiritaanka tababbarka waxaa ka soo qaybgelay masuuliin kala duwan, waxaana halkaas ardayda lagu guddoonsiiyey shahaadooyin.



KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO

Qaafiyadda

Qaafiyad waxa loola jeedaa xaraf had iyo jeer ku soo noqnoqda baydka maansada, waxaana loo cuskadaa in uu maansada dhadhan iyo xallad u yeelo. Qaafiyaddu waa astaan ay wadaagto maansada Soomaaliyeed oo idili, ha ahaato gabay, guuroow, buraanbur, hees ama wiglo. Astaantani haddii ay ka maqantahay maansada waxa la yiraahdaa: “Deelqaaf baa ku jira maansada.”

Maansada beydkeedu ka kooban yahay laba lugood waa in ugu yaraan lug walba laga helo eray ku bilowda xarafka ruuxa maansaaga ahi qaafiyad ahaan u doortay. Haddii ay tahay hal lugna waa in lugtaa ugu yaraan mar laga helaa.

Aan tusaale u soo qaadanno tixdan Cilmi Boodhari, oo xaraf-qaafideedkeedu yahay xarafka “h”.

Sidii geel harraadoo wax badan, hawdka miranaayay

Oo haro la soo joojiyoo, kuraygu heegaayo

Oo hoobeey loo qaaday iyo, hadal Walwaaleedka.

Maansada waxa laga eegaa laguna qiimeeyaa xagga qaafiyadda. Maansayahanka ka tallaabsada xeerkan waxa lagu tilmaamaa mid aan ku xeeldheerayn maansada, wuuna ku qiime dhacaa.

Maansadu waxa ay leedahay wax qaafiyadda ka weyn oo aanay ka maarmi karin oo ah miisaanka ama dhiska beydka oo aan la'aantii beyd qumman oo maanso ah qofna curin karin.

Xeerka qaafiyaddu aad buu u adag yahay, erayaduna iska qaado ma aha ee waxa shardi ah:

1. In xarafka qaafiyaddu aanu beddelin ujeeddadii maansada laga lahaa.
2. In xarafkaasi aanu dhaawicin miisaanka iyo luuqda.

Xaraf-qaafidayeedku isma dhaafdhaafi karo oo haddii mid la qaato waa in kaas uun lagu socdo. Shaqallada waxaa loo xisaabiyaa hal xaraf oo ah alif. Si kasta oo maansaagu ciriiri u galo shibbane kale kuma lammaanin karo kii ay qaafiyaddu ku socotay. Erayada qaarkood sida baa, oo, ee iwm, kuma iman karaan xaraf qaafiyadeed ee waxa loogu dhaqmaa kaliyaale. Maadaama ay qaafiyaddu u tahay laga ma maarmaan maansada, marka ay hal-abuurku dhibaato kala kulmaan helidda xarafka waxay qaataan eray qalaad ama mid bay inta samaystaan micne u yeelaan. Maansaaga wanaagsan qaafiyaddu ma jiidato, ujeeddadiisana ma kala weeciso, ee si dhibyar buu isaga tiiriyaa. Qofka aan maansada buuniga ku ahayni waxa uu ku barbarriiqdaa qaafiyadda, kana habaabaa tubtiisa. Arrintaasina waxa ay keentaa in uu soo saaro hadallo maran oo aan xigmad iyo murti midna wadan.

Qaafiyaddu maaha wax maansada uun loo adeegsado ee waxa ay soo gashaa wax kastoo xigmad iyo murti ay ku dheehan tahay, oo qof ku dhawaaqo.

Tusaale: Geed baa wuxuu yiri: “Haddaan gabalkay kugu jirin, gudineey ima aad goyseen”.

*Qoraa Dayax Axmed-Ilay
ayaa soo koobtay Astaamaha guud ee
maansada Soomaaliyeed bb. 1-3.
Prof Cabdalla Cumar Mansuur*

SUUGAANTA & HAL-ABUURKA

Halwad

Waxay ahayd amin gabal gaab ah, oo ay xooluhu u hollanayaan ubadkoodii in ay dhaadhiyaan. Dadkuna ay u diyaar garoobayaan carraabinta xoolaha iyo xarayntooda. Axmed waxa uu ahaa wiil reer magaal ah, oo gu'ga uun u soo caano doontay reerka. Hase yeeshee, ciidan ayaa looga maarmi waayay, waxaana loo diray in uu awrta soo carraabiyo.

Kolkii uu soo gaadhay awrkii u horeeyay ayuu si kedis ah wuxuu u arkay, wiil isaga ka yar balse la yaaban qaabka uu u socdo iyo lebiskiisa. Waxa uuna ku yidhi: "Waar maxaad iga eegaysaa, ma bil baa iga bilatay?" wiilkii ayaa yidhi. "Maya, reer magaalow waxa aan daymooday futoxumeeyahan calalka ah eed moodo karbaash dhammaaday. Ee miyaanad xishoonayn waxan maad iska xoortid."

Axmed oo yaaban ayaa ku yidhi: "Walaal xoori maayee, cawradaada asturo, intaana waxa ii dheer i caawi oo awrta ii xarig fur." Wiilkii yaraa ayaa la yaabay ninkan ka weyn ee aan xataa garanayn seetada waxa uuna ku yidhi: "Reerma ayaa tihii?" Axmed ayaa yidhi "Waar reerkii waan ka imiye i caawiyoo, waxaan garanayn faraha la geli maayee awrta ila kaxee lacag baan ku siinayaaye." Wiilkii yaraa ayaa ku yidhi imisa ayaad i siinaysaa bal i tus lacagta aad i siinaysid." Waxa uu aamini waayay ninkan surwaalka daldaloola wataa lacag xaggee ayuu ka keenayaa, illeyn haddii uu lacag haysto isagaa-ba dhar ku iibsanaa lahaaye. Axmed ayaa arkay in aanu aaminayn illaa uu lacagta tuso. Waxa uuna soo bixiyay lacagtii. Wiilkii yaraa ayaa ku qancay isaga oo quudhsanaya xoolo-moognimada haysa ninkan gaashaanqaadka ah. Waxa uuna ku yidhi: "Awrta haddii aan maanta kula kaxeeyo, berrina sidee baad yeelaysaa?"

Axmed ayaa ku yidhi: "Magaalada ayaan ku noqon doonaa isla berriba."

Axmed ayaa wiilkii weydiiyay magaciisa. Wiilkii ayaa ku yidhi: "Mataan ayaa lay yidhaa." Kolkii ay cabbaar wada socdeen ayaa waxa ay ku soo baxeen laba nin oo isku haysta meel dhabbe ah, oo qir iyo qir kala taagan.

Mataan ayaa nabdaadiyay oo ku yidhi: "Maxaad sheegteen?" mid ka mid ah labadii nin ayaa ku yidhi nabad baanu sheegnay, balse, Ilaahay baa noo kiin keenaye noo gar qaada waanu is haysannaaye. Waxa soo booday Axmed waxa uuna yidhi: "Maxaad isku haysataan?" Mid ka mid ah labadii nin ayaa yidhi: "Arradka dan baa keenta, yeelka-deede ninkan gu'gii hore, ayaan neef irmaan ah siiyay, waxaannu ku heshiinnay in uu dayrtii hore ii soo celiyo. Bal weydiiya muslim Allow ninkani halkuu sacaygii geeyey." Axmed ayaa yidhi: "Bal adna gardhigo." Ninkii ayaa yidhi: "Waa runtii, waxa uu i siiyay neef agoor ah, neefkiina jiilaalkii ayuu baxay." Axmed oo la yaaban labada nin ee waaweyni waxa ay isku haystaan ayaa ku yidhi: "Adigu wax aad nin siisay maxaa ku daba dhigay? Adna orod ninkan iskaga tag oo hawlahaaga raaco." Yaab iyo amankaag ayaa lala kala jeestay illeyn horaa loo yidhi xaajo nimaan ogayni indhuhuu ka ridaa.

Mataan oo arrinta garwaaqsaday ayaa ku yidhi: "Xaq iyo xeer mid uun bay geliye, inna keena aanu gacadaa idinla raadinee, haddii kale anaa idin raacayee ninkan halwadka ah iga reeba."

Ninkii saca ka maqnaa ayaa ku yidhi mataan: "Adiga waan ku gartaye, ninkani muxuu ahaa?" Axmed oo dhibsanaya wiilka ka yar ee arrimihiisa la weydiinayo ayaa si degdeg ah ugu jawaabay: "Waxa aan ahay nabadoon balse weligay ma arag ruux kaa indho adag,

sidee baad ku keentay nin rag ah wax aad siisay in aad u qabsatid?” Yaab, mar kale ayaa la day-mooday oo afka gacma la wada saaray! Axmedna isma waaline waxa uu ka dalbaday Mataan inay baxaan si aanu wakhti ugaga lumin meesha si uu awrta xilli hore u geeyo. Mataan oo dareensan in aanu garanayn waxa la isku haysto ayaa waxa uu ku yiri: “Axmedow, nimankani waxay isku haystaan maad garane, orod oday nimankan kala saara doon haddii kale oo ay is dilaan, dhibaataada wax baad ku yeelanaysaa.” Axmed isma waaline waxa uu yidhi: “haye, i sii suga” isaga oo u kicitimay dhanka tuulada kolkii uu in cabbaar socday ayaa uu la kulmay nin oday ah oo baadidoon ah.

Waxa uuna ku yidhi: “adeer laba nin ayaa meel dhaw isku haysta, midbaana gardaran ee kaalay wax kala dheh adaa iga wayne.” Ninkii odaga ahaa isaga oo yaaban, eegayana kuraygan dhididsan ee haddana xukumay gardarrada, ayuu ku yidhi: “Adeer, baadidoon baan ahaaye in baadidaa badbaado, inna wax geel aaran u badan ma aragtay?”

Axmed waxa uu ugu jawaabay “Nimanka ayaa isku haysta.” Odaygii oo yaabban ayaa soo raacay nimankii kolkii uu soo gaadhay ee uu nabdaadiyay ayaa uu uga warramay waayihiisa iyo wixii dhex maray isaga iyo wiilka. Waxa uuna intaa raaciyay inuu u baahan yahay geeliisii. Mataan oo dareemay in uu Axmed wax qaldan odayga u soo sheegay ayaa uga warramay wax-yaalaha la isku hayo iyo halka uu arrin joogo. Odaygii oo garwaaqsaday arrinta ayaa xaajadii galay, wuxuuna ku kala xukumay in ay xeer u lahaayeen qoysaska labada nin ee is haystay. Irmaan baxay in aan la isu qabsan. Aqbal iyo guddoon ayaa lagu faataxaystay.

W.Q

Maxamed Xasan Cabdullaahi (Geelle)

Gablanyoo Afkii Hoog!

Maansadan waxaa tiriyay abwaan Suldaan Cabdi Siyaad “Qabdiid”, degan Muqdisho. Wuxuu ugu baroordiiqayaa marxuum Maxamed Daahir Afrax. Maansada oo aad u dheerayd awgeed, qayb Ayaan ka soo qaadannay. Wuxuu yiri:

- 1) Geddi inna Suldaanee
- 2) Gaariye tilmaamaad
- 3) Anna galabta ii tee
- 4) Geeriyeeey xis- hoodlaay
- 5) Gujadaadu ba'anaa!
- 6) Carro-edeg giraan iyo
- 7) Illayn waa galgalinoo
- 8) Waa gegi bannaanoo
- 9) Geeri lagu sugaayee
- 10) Hadduu maanta go'ayoo
- 11) Afrax goob dalluun iyo
- 12) Godka lagu uruuriyay
- 13) Gablanyoo afkii hoog,
- 14) Gudhe oo fankii dhimay,
- 15) Gabxan dhaqankii waynaa,
- 16) Isu gee kurtoodoo
- 17) Goloofow hiddihi jiray!
- 18) Adba waad ga-blooshoo
- 19) Waad guul-habowdoo
- 20) Hegal baa ku saarane
- 21) Giddi sheeko bilaneeey
- 22) Go`do yaa dib kuu qori?
- 23) Gunta iyo odhaahdii
- 24) Wuxuu ahaa gurays iyo
- 25) Garbi lagu nagaadoo
- 26) Galaayuuska qaylada
- 27) Galow wiida yeedhshiyo
- 28) Giddigood naflaydii
- 29) Hadday wada gubteeno
- 30) Geerida qoraagii
- 31) Galka iyo bannaankiyo
- 32) Gubanka iyo oogadu
- 33) Gambo liid casaanliyo
- 34) Asay gunud xidheeno
- 35) Gambigoodu fooraro
- 36) Anna waa gartay oo
- 37) Waa laba gardaymoon
- 38) Adna waa go`aankaa
- 39) Geerida wax qaaddaay
- 40) Guullana u mahadnaqay.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga


Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA) waa xarun aqooneed loo abuuray daryeelka iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed. Waa madal ay ku bahoobeen dalalka Geeska Afrika ee Soomaalidu degto, AfSoomaaligana lagaga hadlo.

AGA waxaa lagu asaasay dalka Jabuuti bishii Juun 2013. Xarunteedu waa Magaalada Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Magaalooyinka waaweyn ee Geeska Afrika iyo dalalka qurbaha ee ay aad u joogaan Soomaalidu.

Hawlgalka AGA (Mission)

Ilaalinta afka hooyo, iba-furka hal-abuurkiisa iyo turxaan-bixinta adeegsigiisa, qoraal iyo qawlba; iyo inuu Af-Soomaaligu noqdo afka rasmiga ah ee maamulka iyo waxbarashada geyiga Soomaalida.

Konton-guurada Hirgelinta Far-Soomaalida (1972-2022)



Bare Sare Cabdalla Cumar Mansuur
Guddoomiyaha Guddiga Qabanqaabada